



جوهية الرحمة العالمية  
RAHMA INTERNATIONAL SOCIETY



# مسارات خيرية

## CHARITABLE PATHS

Warsidaha saddex biloodlaha ah ee ARC, cadadka 3aad, Hargeysa Somaliland



Barbera Road - Hargisa



00252633278256 - 00252514333



somaliaoffice1@gmail.com

[www.aresom.org](http://www.aresom.org)

# Hay'adda ARC Ayaa Xadhiga Ka Jirtay Laba Masjid

Hay'adda Gargaarka Afrika ee ARC ayaa xadhiga ka jirtay laba masaajid oo ay ka hirgelisay Somaliland iyo Soomaaliya. Masaajidka Marxuum Cabdirasaaq Maxamuud Al-Xasan oo ay ka dhistay xaafadda Masalaha ee caasimaadda Hargeysa, jamhuuriyadda Somaliland iyo masaajidka Nuurah Ciwad Sacad Al-Mudayri oo ay ka dhistay magaalada



Marka, gobalka Shabeelaha dhexe ee Soomaaliya. Labada masaajidba waxaa laga dhisay dhul cabbirkiisu dhan yahay 70 mitir oo isku wareeg ah, waxa aana la socda qaybihii waysada, xamaamyo iyo Qolalka adeegga, iyada oo Masaajid kastaa uu qaadayo illaa 160 qof halkii mar. Lixdii bilood ee u horreeyey sannadka 2021 ka waxa ay hay'adda ARC xadhiga ka jartay 11 masaajid oo ay ka dhistay deegaanno kala duwan oo Somaliland iyo Soomaaliyaba ah.

# Xarunta Sacad Bin Mucaad ee xifdiga Qur'aanka Kariimka ah oo xadhiga laga jaray

Hay'adda Gargaarka Afrika ee ARC ayaa xadhiga ka jirtay Xarunta Sacad Bin Mucaad (Alle ha ka raalli ahaado) ee xafidista iyo Barashada



Qur'aanka Kariimka ah oo ay ka dhistay magaalada Borama ee jamhuuriyadda Somaliland. Dhismaha xarunta oo qayb ka ah dadaalka u adeegista Qur'aanka Kariimka ah iyo danaynta Barbaarinta suuban ee Ubadka umadda muslmiinta, waxa ay ku fadhidaa dhul cabbirkiisu dhan yahay 50 mitir oo labajibbaaran, waxa aanu ka kooban yahay laba fasal waxbarasho oo midkii qaadayo 50 arday, qalabkooda waxbarashaduna u dhammaystiran yahay. Waxaa xusid mudan, in isla sannadka 2021 ka lixdii bilood ee hore ay hay'adda ARC xadhiga ka jartay 8 xarumood oo lagu xifdiyo Qur'aanka Kariimka ah.

# Qodaalka iyo diyaarinta (12) ceel oo ay ka faa'idaysteen (6700) oo muwaadin



Mashaariicda dhinaca biyaha ee ay hay'adda ARC ka fuliso magaalooyinka iyo deegaannada Somaliland iyo Soomaaliya, oo ujeedadoodu tahay xakamaynta khataraha ka dhasha xilliga jiilaalka, oo sababa in muwaadiniin

badan ay u suurtageli weydo in la helo biyo nadiif ah, caafimaadqaba oo ku filan baahida cabbitaanka. ARC waxa ay waxa ay qodday isla markaana diyaarisay 12 ceel oo ay ka mid yihiin 5 ceel gacmeed oo dhismahoodu sibiidh yahay, isla markaana leh waadaan la darayo iyo dar Xoolaha laga waraabinayo oo hoos u qodan 10 illaa 20 M3. Waxa kale oo ka mid ah 7 ceel-dheer oo leh nidaamka tamarta qorraxda (Solar), mid kasta oo ka mid ahna loo rakibay taangi biyood ballaciisu gaadhayo 10M3 oo saaran tiir (Toowar) dheer. Waxa kale oo ceel

kasta loo sameeyey dar biyood, iyada oo sida oo kalana loo rakibay, lagana shaqaysiiyey bam sabbaynaya oo ku shaqeeya tamarta qorraxda, kaas oo leh laba dhuumood oo xooggan. Bamkaas oo loo diyaariyey, loona tijaabiyey si ku habboon biyo shubka ceelka, si ay biyuhu si habsami ah uga soo burqadaan, sida oo kalana ugu shubmaan barkadaha biyaha laga cabbi karo iyo ceelasha loogu talagalay waraabka Xoolaha. Ceelashani waxa ay si dhammaystiran u daboolayaan baahida biyood ee dadka ka faa'idaysanaya oo ay tiradoodu ka badan tahay 5600 oo qoys.

## Faahfaahinta qodaalka iyo diyaarinta ceelasha

	Faahfaahinta Ceelka	Nooca ceelka	Deegaanka uu ku yaallo	Tirada ka faa'idays- teyaasha
1	Ceelka 'Hay'at Al-khayriya Al-Islaamiya	Ceel-dheer	Shabeelaha Dhexe	720 Qoys
2	Ceelka Al-Raaxi muun 23	Ceel-dheer	Banaadir, Soomaaliya	720 Qoys
3	Ceelka Muxamed Maxamuud Al-Kahayji	Ceel-dheer	Baydhabo, Soomaaliya	1000 Qoys
4	Ceelka Cadnaan Muxamed Bu-carkhin	Ceel-gacmeed	Marka, Soomaaliya	170 Qoys
5	Ceelka Al-Raaxi muun – 13	Ceel-dheer	Gebiley, Somaliland	750 Qoys
6	Ceelka Can kuli Caqim	Ceel-Gacmeed	Bay – Baydhabo Soomaaliya	170 Qoys
7	Ceelka Al-raaxi muun– 12	Ceel-dheer	Gebiley, Somaliland	750 Qoys
8	Ceelka Asad Cabdallah Maxamud Al-Kandari	Ceel-gacmeed	Sh. Dhexe, Ceel-Mareer Soomaaliya	750 Qoys
9	Ceelka Hi ba Axmed Mustafa (AHUN)	Ceel-gacmeed	Sh. Dhexe, Jowhar Soomaaliya	170 Qoys
10	Ceelka Al-Raaxi muun-32	Ceel-dheer	Marka Ceel-Geela, Soomaaliya	750 Qoys
11	Ceelka Falaax Fahad iyo Wadxah Khalaf	Ceel-Gacmeed	Sh. Hoose, Marka, Soomaaliya	170 Qoys
12	Ceelka Marxuum Xasan Axmed	Ceel-dheer	Baydhabo, Soomaaliya	1000 Qoys

# Mashruuca Kutubta Qur'aanka ah loogu qaybiyo Masaajidda iyo ruqaha Qur'aanka ee Hargeysa



Hay'adda ARC waxa ay u heellantahay qaybinta Kutubta Qur'aanka Kariimka ah, iyada oo ka duulaysa aaminsanaanteeda ah in qof kasta oo muslim ahi uu kitaab Qur'aan ah u baahan yahay, maadaama oo uu quluubta dhiirrigelin u yahay, isla markaana xoojinayo xidhiidhka ka dhexeeya Allaah (SWT), waxa ay sannadkan hirgelisay Mashruuc ay ku qaybisay kun Kitaab, kaas oo ay ujeedadiisu tahay in Kitaabka sharafta leh la gaadhsiiyo masaajidda iyo goobaha lagu barto Qur'aanka Kariimka ah, gaar ahaan xaafadaha dadka Saboolka ahi degaan

ee caasimadda Hargeysa, Jamhuuriyadda Somaliland.

Kutubta qaybintooda waxaa goobjoog u ahaa qaybta mashaariicda ee hay'adda, waxa aanay masuuliyiintu dadka kutubta loo qaybiyey iyo dadkii kale ee munaasabadda ka soo qaybgalayba ku boorriyeen ixtiraamka Kitaabka Alle, oo ah dastuurka qof kasta oo muslim ah, waxa kale oo ay ku dhiirrigeliyeen in kitaabka si weyn loo daryeelo lana dhigo meel u cuntanta; haddii ay tahay Masaajidda, dugsiyada Qur'aanka iyo guryahaba.



## Saddex kolonyo caafimaad oo bilaash ah waxaa ka faa'iidaystay 4 kun oo muwaadin

Hay'adda ARC oo kaashanaysa cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa (HIH) waxa ay agaasintay saddex kolonyo (Safar) caafimaad, taas oo qayb ka ah mashaariicda caafimaadka ee ay ARC ka fuliso guud ahaan deegaannada iyo magaalooyinka Soomaaliya iyo Somaliland, si dhaqso wax loogu qabto bukaanka iyo xaaladaha culus ee aan awoodayn in ay iska bixiyaan kharashaadka daweynta. Kolonyooyin caafimaad oo isugu jira gudaha iyo duleedka Hargeysa. Adeeggan caafimaad ee bilaa Lacagta



ah oo laba maalmood socday waxa uu ka koobnaa dhammaan takhasusyada kala duwan ee uu cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa (HIH) siiyo dadweynaha, waxa aana ka faa'iidaystay dad ka badan kun

qof, sida oo kale waxaa jirtay kolonyada caafimaad ee Alkhayr oo ku baxday xerada Barkacayaasha ee Digaale oo ku

taalla duleedka Hargeysa, waxa aana ka faa'iidaystay 800 oo muwaadin, iyada oo xaaladaha khatarta ah ee u baahan Qalniin ama in la dhigo cisbitaalka qaybta xaaladaha culus loo diray xarunta

cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa (HIH). Waxa kale oo ka mid ahaa olole adeeg caafimaad oo bilaa lacag ah

lagaga fuliyey xarunta (Mujamac) samafalka waxbarashada Al-Kuweyt ee caasimadda Hargeysa, halkaas oo ay kolonyo caafimaad ololahan ka wadday muddo saddex maalmood ah oo ay adeegga caafimaad siiyeen dhammaan qaybaha xarunta; wiilasha, Hablaha iyo qaybta xanaanada Carruurta. Warbixinahooda caafimaadna waxaa loo gudbiyey xarunta rasmiga ah ee cisbitaalka Caalamiga ah ee (HIH)

ee caasimadda Hargeysa si ay dib u eegis ugu samayso xaaladaha caafimaad loona hubiyo caafimaadka ardaydaas. Waxaa ololahaas ka faa'iidaystay 813 arday wiilal iyo gabdho isugu jira.

# Mashruuca Ciidal Adxa - Somaliland, Soomaaliya iyo Deegaanka Soomaalida

Hay'adda gargaarka Afrika (ARC) sannadka 1442 H - 2021 M waxa ay fulisay mashruuc ay hilibka Adxada ku qaybisay Soomaaliya, Somaliland iyo Deegaanka Soomaalida Itoobiya (Jigjiga), waxa aana ka faa'idaystay 23,036 qoys ka mid ah qoysaska baahan ama dhowrsoon, taas oo u dhiganta in la gaadhsiiyey 138, 216 Muwaadin.

Mashruucan oo qayb ka ah Mashaariic xilliyeedka ay fuliso hay'adda Gargaarka Afrika, waxaa maalgelisay Jimciyadda Caalamiga ah ee Al-Raxma ee dalka Kuweyt iyo samafalayaal ka soo jeeda dalka aynu walaalaha nahay ee Kuweyt. Waxa kale oo sannadkan ka qaybqaatay tiro ka mid ah hay'adaha samafalka.

Mashruucan oo ay hay'adda ARC sannad kasta fuliso ujeedadiisu waa in farxadda Ciidda la gaadhsiiyo guryaha dadka baahan, iyo in badhaadhaha la

gaadhsiiyo quluubtooda, lagana yareeyo culayska saboolnimada iyo fara madhnaanta. Maamulka hay'adduna waxa uu bogaadinayaa dadaalka dadka taageerada siiyey iyo kuwa ka qaybqaatay mashruucan bulsho, taas oo ka turjumayso isku tiirsanaanta Muslimiinta iyo dareenka waajibka walaalnimo ee munasaabaddan weyn.



## Furitaanka carwada soo bandhigista waxsoosaarka mashaariicda waxsoosaarka leh ee ARC

7dii May 2021 (Sabti), waxaa xadhiga laga jaray carwo lagu soo bandhigayo waxsoosaarka mashaariicda si loogu soo bandhigo waxsoosaarka mac-hadka farsamada Gacanta, Beerta Khayraad, iyo Mofooyinka / Foornooyinka samafalka ah.

Waxsoosaarka qaybahaas kala duwan ee lagu iibiyo carwadan, oo uu ugu muhiimsan yahay



Faarnijarka (Furniture), noocyada kala duwan ee khudradda iyo midhaha kala duwan ee darayga ah, iyo sida oo kale mofooyinka, dakhliga ka soo xarooda waxaa dib loogu isticmaalaa qayta waxbarashada ee (Kaamka) Mujamaca Alkuweyt, si loogu sii horumariyo, loona fududeeyo adeegga uu u hayo guud ahaan Somaliland.

Waxaa xusid mudan, in carwadani ay ka qaybqaadato in jihooyin cusub loo furo dhalinyarada waxsoosaarka Mac-hadka farsamada gacanta, iyada oo fursad loo siinayo in waxsoosaarkooda si bilaa lacag ah loogu gaadhsiiyo suuqa, loona sameeyo suuqgeyn iyada oo lala kaashanayo dhinacyada ay khusayso.

# M adasha Hoggaannada maamulka iyo waxbarashada ee ARC



Madal kulmisay hoggaannada maamulka iyo waxbarashada ee ARC ayaa markii ugu horreysay lagu qabtay xarunta Hargeysa, maalmihii 7 illaa 10 sabtembar 2021 ka.

Kulankan waxaa ka soo qaybgalay madaxda mashaariicda, masuuliyiinta waxbarashada iyo maamuleyaasha iyo kormeerayaasha dugsiyada ee dhammaan xarumaha Somaliland; Hargeysa, Burco, Borama iyo Laascaanood, Muqdisho Soomaaliya iyo Jigjiga, dawlad deegaanka Soomaalida.

Kulankan oo ujeedooyinkiisa ay ka mid ahayd isbarashada, isdhexgalka iyo waayoaragnimo isdhaafsigu hawl wadeennada hay'adda, in ka qaybgalayaashu xogogaal u noqdaan jihada istaraatiijiyadeed ee hay'addu ku sii soconayso, loona iftiimiyo aasaaska iyo farsamooyinka horumar iyo maamul ee hay'adda iyo in ka qaybgalayaasha lagu tababaro hababka diyaarinta iyo qoraalka qorsheyaasha iyo tayeynta adeegyada samafal ee ARC, taas oo qayb ka ah yoolasha istaraatiga ah ee hay'adda.

Madasha waxaa furay guddoomiyaha guud ee ARC Cabdiraxmaan Almucallimi, oo ka qaybgalayaasha u jeediyey hadallo isugu jira talo iyo tusaalayn ku aaddan siyaasadaha hay'adda. "Hoggaannada maamulku waxa ay ka mid yihiin

sababaha ugu muhiimsan ee guusha iyo waxtarka hay'adda, iyo xoojinta awooddaheeda fulineed iyo qorsheyaasheeda istaraatiijiyadeed ee ay ku gaadhayso higsigeeda sare." Ayaa ka mid ahaa hadallada guddoomiyaha oo intaas ku daray, in madashan lagu soo bandhigi doono fahamka hoggaaminta iyo hannaanka ugu muhiimsan ee loo maro.

Madaxa Arrimaha waxbarashada ee ARC, Ciid Cabdalladiif oo isaguna ka qaybgalayaasha hadal u jeediyey ayaa sheegay in ujeedada madashani ay tahay xoojinta xirfadaha hoggaanka waxbarashada iyo kobcinta awoodahooda fulinta qorsheyaasha istaraatiijiyadeed, la jaanqaadista isbedellada ay samayso waaxda waxbarashadu iyo baahiyaha waxbarashada.

Madashan waxaa iyaguna Khadka isgaadhsiinta internet ka ee 'Zoom' kaga qaybgalay madaxa waaxda waxbarashada ee hay'adda Caalamiga ah ee Al-Raxma Dr. Turki Alxamiidi iyo Dr. Xasan Al-Rasmi oo ah tababare Barnaamijyada Horumarinta maamulka ah oo labaduba ku sugan dalka Kuweyt, waxa aanay ka qaybgalayaasha la wadaageen aqoonta iyo waayoaragnimadooda hoggaamineed iyo maamul.



# Tababarka diyaarinta warbixinta shaqaalaha ARC



Maamulaha Qaybta taageerada farsamo ee ARC Eng. Muxamed Aljaabiri ayaa dhammaan qaybaha iyo waaxyaha hay'adda siiyey tababar miisaan leh oo lagu kobcinayo xirfadaha diyaarinta warbixinaha

iyo soojeedimaha (Proposals) iyada oo loo marayo Cilmibaadhista, falanqaynta iyo isku dubaridka xogta, si loo helo natiijo wax-ku-ool ah oo la isku hallayn karo. Waxa kale oo tababarka ka mid ahaa xirfado horumarsan oo loo adeegsanayo hababka iyo manhajyada ugu casrisan, taas oo faa'iido iyo kobcin u ah afkaarta iyo fahamka hababka diyaarinta warbixintaha iyo tixidda wax-qabadka iyada oo la adeegsanayo halbeegyo cadcad oo la daraaseeyey.

Madax waaxeedyada iyo Hawlwadeennadu waxa ay ka faa'iidaysteen tababarkan oo waxtar u leh dhinacyo ballaadhan oo ka mid ah hawlaha u baahan xirfadaha gaarka ah ee habka diyaarinta qabyaqoraalka iyo qoraalka warbixinaha iyo soojeedimaha (Proposals) iyada oo loo adeegsanayo hab xirfadeed oo cilmiyeysan, taas oo la xidhiidha shaqada ay qayb kastaa leedahay.

## 3 Macallin oo ku gulaystay kaalmaha hore ee Tababar macallimiinta Afka Carabiga



Macallin Bashiir Muxamed Cabdillaahi oo afka carabiga ka dhiga dugsiga hoose ee xarunta (Mujamac) Kuweyt ee samafalka waxbarashada, ayaa ku guulaystay kaalinta koowaad ee Koorsooyin Afka Carabiga ah oo loogu talagalay dadka aan ku hadal Carabida.

Koorsadan waxaa soo qaban-qaabisay Jimciyadda Caalamiga ah ee Al-Raxma oo kaashanaysa xarunta 'Aluqat Al-carabiya Lil Jamiic'.

Waxa aana ka qaybgalay tiro badan oo ka mid ah macallimiinta Afka Carabiga dhiga, waaxaha waxbarashada ee dhammaan xafiisyada dunida ay ku leedahay hay'adda Caalamiga ah ee Al-Raxm. Kaqaybgalayaasha waxaa laga qaaday imtixan lagu hubinayey kartidooda, kaas oo lagu soo xulay 39 kii macallin ee ugu sarreeyey si ay u qaataan koorsada.

Koorsadu waxa ay socotay Shan maalmood ah oo u dhexeeyey 19kii Ilaa 23kii August 2021. Mawaadiicda lagu tababaray oo kala duwanaa, waxaa ka mid ahaa curiyeyaasha iyo xirfadaha barista afka carabiga; waxaa ugu sii muhiimsanaa dhawaqa, ereyada, dhismaha weedha, iyo xirfadaha kale ee ay ka mid yihiin dhegeysiga, naxwaha

afka, akhriska iyo qoraalka.

Gebogebadii koorsadan, xafiiska Hargeysa ayaa ku guulaystay saddexda kaalmood ee ugu sarreeya; Waxa kaalinta labaad galay, macallin Axmed Al-Muqaddam oo ah bare afka carabiga ka dhiga qaybta Hablaka ee Xarunta Kuweyt – Hargeysa, halka kaalinta saddexaadna uu ku guulaystay Macallin Cabdarasaaq Muxamed oo Afka Carabiga ka dhiga dugsiga sare ee Xarunta Kuweyt ee Hargeysa. Guud ahaan ka qaybgalayaashana waxa ay xarunta 'Alluqat Al-carabiya Lil Jamiic' guddoonsiisay shahaadooyinka aqoonsiga waxa ay barteen.

Maamulka Xarunta Al-Kuweyt iyo hay'adda ARC waxa ay dhambaal hambalyo iyo bogaadin ah u dirayaan macallimiinta kaalmaha hore ka gashay imtixaanka, waxa aanay u rajaynayaan guul iyo horusocod intaas ka sii badan.

# Ardayda kaalmaha hore ka gashay heerarka waxbarashada xarunta Kuweyt oo la abaalmariyey



Maamulka Xarunta waxbarashada samafalka ah ee Al-Kuweyt (Mujammac Alkuweyt) ayaa munaasabad abaalmarin ah u qabatay, ardaydii kaalmaha hore ka gashay imtixaanaadka sannad-dugsiyeedkii 2020/2021 ee heerarka kala duwan ee waxbarashada.

Munaasabada oo 22ka Ogosto 2021 lagu qabtay xarunta Al-Kuweyt (Mujammac), waxaa ka soo qaybgalay masuuliyiin ka socotay wasaaradda waxbarashada iyo sayniska Jamhuuriyadda Somaliland, maamulka hay'adda ARC, maamuleyaasha iyo macallimiinta xarunta waxbarashada samafalka ah ee Alkuweyt (Mujammac Alkuweyt), Waalidiinta iyo ardayda.

Maamulaha xarunta waxbarashada Al-Kuweyt (Mujammac Alkuweyt) oo munaasabadda ku soo dhoweeyey marti sharafta ayaa mahadnaq u jeediyey hay'adda Caalamiga ah ee Al-Raxma ee dalka Kuweyt oo maalgelisyay mashruuca waxbarashada, isaga oo si gaar ah u xusay qaybta agoomaha ee ay kafaalo qaado. Waxa kale oo uu ammaan iyo dhiirrigelin u jeediyey ardayda kaalmaha hore gashay, guud ahaan ardaydana ku boorriyey dadaalka waxbarashada.

Marwo Aamina Casayr Magan, guddoomiyaha waxbarashada degmada Hargeysa oo munaasabadda hadal ka

jeedisyay ayaa xarunta ku ammaantay hawlaha waxbarasho ee sida baaxadda leh uga socdo, iyo tayada ardaydeeda ee geyeysiisay in tiro sidaas u badani ay kaalmaha hore ka galaan natiijooyinka imtixaanaadka.

Marwo Aamiina waxa ay dhinaca kalana mahadnaq u jeedisyay dawladda Kuweyt iyo shacabkeeda maalgeliyey xarunta bani'aadamnimo ee ay ka aflaxeen welina ka sii aflaxayaan in badan oo ka mid ah da'yarta Somaliland, "Deegaanka xarunta oo keliya ayaa aanay jirin wax loo dhigaa, waa deegaan ay carruurta wax ku baran karto. Ilmuhu marka uu soo galo deegaankaas quruxda badan, ee macallimiintii iyo maamulkii diyaarka ku sii yihiin, hammi iyo niyad ayuu u helayaa waxbarashada. Dad ladan oo lacag haysta ayaan nasiib u helin bey'addaas quruxda badan iyo waxbarashadaas"

Munaasabadda waxaa isaguna hadal ka jeediyey Mudane Sayid Xuseen Mutawali, ku simaha hay'adda gargaarka Afrika 'ARC' oo fulisa mashaariicda hay'adda Caalamiga ah ee Al-raxma. Waxa uu bogaadiyey maamulka iyo macallimiinta waxbarashada, waalidka iyo sida oo kale ardayda oo uu sheegay in dadaalkooda isbiirsaday uu suurtageliyey in heerkan ay ardaydu gaadho. Si gaar

ah ayaanu ugu mahadnaqay hay'adda Caalamiga ah ee Al-Raxma, "Waxa aan mahadnaq gaar ah u jeedinaynaa hay'adda Caalamiga ah ee Al-Raxma oo ka qaybqaadatay hal-abuurka iyo aasaaska xarunta aadka u ballaadhan ee waxbarashada samafalka ah Al-kuweyt" Ardayda xarunta Al-kuweyt ayaa iyaguna munaasabadda ka soo jeediyey barnaamijyo isugu jira maaweelo iyo soo bandhigista hibooyinkooda iyo hal-abuurradooda kala duwan. Arday Cabdiqani Yuusuf Xayd oo ku hadlaya magaca ardayda la abaalmariyey ayaa kelmad mahadnaq ah ka soo jeediyey munaasabadda.

Ugu dambayntii waxaa 60 ka arday ee kaalmaha hore galay oo wiilal iyo gabdho isugu jiray la guddoonsiiyey abaalmarino marinno kala duwan oo ay ka mid yihiin Laptop-yo, waxa kale oo la abaalmariyey ardayda ka qalinjebisyay dugsiga sare ee xarunta, iyada oo la maamuusay ardaygii dhowaan kaalinta koowaad u galay tartanka qur'aanka Kariimka ah ee madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland. Ardayda Hablaha ah ee ka qaybqaatay tartan loogalay in qiyamka loo beddelo waxsoosaar la taaban karo, kaas oo ah tartan ay hay'adda Al-Raxma ee Caalamiga ahi u qabato ardayda dhammaan xarumaha waxbarashada ee raacsan. Waxa kale oo abaalmarin la siiyey saddex ka mid ah macallimiinta helay saddexdii darajo ee ugu horreeyey, tartanka bareyaasha afka Carabiga ee





# Naadiga Hal-abuurka iyo Qiyamka oo hindisay kooxda 'Wacyi'



Naadiga Hal-abuurka iyo qiyamka ee xarunta waxbarashada Al-kuweyt ayaa hindisay barnaamij cusub oo loogu magacdaray 'Wacyi' kaas oo ujeedadiisu tahay faafinta qiyamka fiican iyo kobcinta wacyiga, iyada oo loo marayo beerista afkaarta iyo habdhaqannada togan, kuna dhisan mabda' hal-ku-dheggiisu yahay, "Isbeddelka aad bulshadaada

la doonaysaa adiga ayaa uu kaa bilowdaa". Hindisaha "Wacyi" waxa uu xoojinayaa sidii ardayda loogu beeri lahaa aragtida iskaa wax u qabsada ah, waxa aanu hawshiisa koowaad ee iskaa wax u qabsada ah ka dhigay wacyigelinta qiimaha nadaafadda. Kooxda 'Wacyi' oo ardayda xarunta Al-Kuweyt ka kooban ayaa ka qaybqaatay ololaha nadaafadda ee uu ku dhawaaqay duqa Hargeysa, caasimadda Somaliland. Horraantii sannadka 2021 ka ayaa guddoomiyaha guud ee hay'adda gargaarka Afrika, Mudane

Cabdiraxmaan Almucallimi, waxa uu dugsiyada, mac-hadyada iyo xarunta Al-kuweyt ka hirgeliyey Naadiga Hal-abuurka, iyo Qiyamka oo higsigiisu yahay sarraynta qiyamka barbaarineed ee dhammaan ardayda wiil iyo gabdho labadaba, iyo sida oo kale ibafurka hibooyinkooda iyo hal-abuurkooda, si loo helo arday safirro sharafeed iyo tusaale ku dayasho mudan u noqda wadankooda. Barnaamijyada ugu caansan ee uu Naadigu fulintooda u heellanyahay waxaa ka mid ah in uu abuur guddiyo si gaar ah u daneeya hibooyinka ardayda, kuwaas oo ay ugu mudantahay guddida 'Wacyigelinta iyo hanuuninta' ee ka shaqaysa wacyigelinta iyo beerista qiyamka akhlaaqda iyo anshaxa ardayda, ee hadda ay ka abuurantay kooxda 'Wacyi'.

## ARC iyo Naadiga Hal-abuurka iyo qiyamka fiican oo ka qaybgalay ololaha nadaafadda ee uu ku dhawaaqay duqa magaalada Hargeysa



Hay'adda Gargaarka Afrika ee ARC ayaa ka qaybqaadatay ololaha nadaafadda caasimadda Hargeysa ee uu ku baaqay duqa caasimadda, mudane Cabdikariim Axmed Mooge. Kaas oo ay ujeedadiisu tahay in kor loo qaado wacyiga bulshada ee muhiimadda nadaafadda iyo kaalinta ay ku leedahay dhismaha ummadaha ilbaxaha ah. Ololaha oo bilihii u dambeeyey socday ayaa soo dhoweyn ballaadhan ka helay muwaadiniinta oo iyaga oo aad u tiro badan toddobaad kasta dabayaaqadiisa ka qaybgalaya ololaha nadiifinta

jidadka iyo xaafadaha, lagu rinjiyeynayo dhismeyaasha quruxda u ah magaalada iyo waddada hareeraheeda, qaybtiisii ugu horreysayna si weyn loogu nadiifiyey doxa weyne ee badhtamaha magaalada.

Hay'adda Gargaarka Afrika - Kuweyt, oo u aragta in ololahani uu xambaarsan yahay qiyam tiro badan oo wanaagsan, iyo yoolal sare, waxa ay kaga qaybqaadatay in ay ku deeqday tiro ka mid ah qalabka nadaafadda, iyada oo sida oo kalan hawl wadeennadeeda fursad u siisay in ay tagaan goobaha ololeyaasha nadaafadda magaalada ka socdaan si ay uga qaybqaataan. Waxaa hawshan si gaar ah uga qaybqaatay Barnaamijka Naadiga 'Wacyi' ee hal-abuurka iyo qiyamka

suuban ee xarunta samafalka waxbarashada ee Kuweyt.

Maamulka ARC waxa ay bogaadiyeen muhiimadda ololaha nadaafadda iyo raad togan ee ay u yeelanayso muwaadiniinta deggen magaalada, iyada oo la ogyahay in dalku uu si weyn ugu baahan yahay hindiseyaasha noocan ah oo ruux ku abuuraya dareenka wadaniyadeed, dadka oo dhanna ku dhiirrigelinaya in ay isu kaashadaan si ay isbeddel ugu sameeyaan xaaladdooda hadda iyo horusocodka wadankooda.



# Duqa caasimadda Hargeysa oo booqasho ku yimi xarunta ARC



Duqa caasimadda Hargeysa, mudane Cabdikariim Axmed Mooge ayaa booqasho ku yimi xarunta dhexe ee hay'adda ARC, magaalada Hargeysa Somaliland. Duqa waxaa qaabilay, guddoomiyaha ARC mudane Cabdirxaam Al-mucallimi iyo masuuliyiin ka socda ARC oo wehelinayey. Muddadii uu duqa booqashada ku joogay waxa uu soo maray qaybaha kala duwan iyo laamaha ay ka kooban tahay hay'addu; waxaa ka mid ahaa xarunta samafalka waxbarashada ee Kuweyt iyo qaybaheeda kala duwan ee ay ka midka yihiin; Mac-hadyada farsamada gacanta iyo sida oo kale xarumaha raacsan Mujammaca ee

Somaliland. Ugu dambayntii guddoomiyaha guud ee ARC ayaa duqa magaalada uga mahadnaqay booqashada uu ku soo sharfay, isaga oo hoosta ka xariiqay in yoolka ugu dambeeya ee hay'adda ARC uu ku soo ururayo xoojinta hawlaha waxsoosaarka, iyo Horumarinta bulshooyinka maxalliga ah, taas oo ay u heellantahay rumaynta dhambaalka ay siddo oo ah dhismaha qofka oo xoogga la saaro. Guddoomiye Mucallimi waxa uu bogaadiyey xukuumadda iyo shacabka Somaliland oo ay ugu horreeyaan madaxweynaha jamhuuriyadda Somaliland, mudane

Muuse Biixi Cabdi, golihiisa wasiirrada ee sharafta leh, zubbaha kala duwan ee xukuumadda, iyo guud ahaan haldoorka bulshada oo tan iyo markii la aasaasay, mar kasta hareer taagnaa ARC. Duqa caasimadda ayaa isaguna gebogebadii booqashadiisa waxa uu mahadnaq u jeediyey Hawlwadeennada xafiiska, waxa aanu ku boorriyey in ay dadaal geliyaan wixii dani ugu jirto shaqada, laguna rumaynayo yoolkooda ah in la dhiso



qofka bani'aadamka ah, si uu u noqdo mid naftiisa u wanaagsan, dalkiisa waxtar u leh, shacabka iyo dadka baahanna u adeega.

## Guddoomiyaha guud ee ARC oo booqasho indha-indhayn ah ku tegey xafiisyada hay'adda ee gobalka iyo xarumaha hoos taga



Agaasimaha guud ee ARC, Mudane Cabdiraxmaan Almucallimi ayaa booqasho indha-indhayn ah ku soo maray xafiisyada ARC ee Boorama, Muqdisho iyo Puntland, isaga oo u kuurgalay habsami u socodka

Puntland. Guddoomiyuhu muddadii uu booqashadan ku gudajiray waxa uu soo indha-indheeyey dhammaan qaybaha xafiisyada, waxa aanu si dhow xogogaal ugu noqday baahiyaha

lagama maarmaanka u ah xoojinta tayada adeegyada ay bixiyaan, gaar ahaan kuwa la xidhiidha adeegga bulshada iyo qoysaska danyarta ah ee deegaannadaas. Waxa kale oo uu u kuurgalay kaalinta weyn ee ay xafiisyadaasi kaga jiraan adeegyada qaybaha kala duwan ee bulshada deegaanka. Guddoomiyuhu waxa uu ammaanay dadaalka shaqo ee ay masuuliyiinta maamulka iyo hormuudka shaqada geliyeen bixinta adeegyo heerkoodu sarreeyo, isaga oo bogaadiyey dadaalka ay ku bixiyeen Horumarinta shaqada iyo adeegga bulshada, iyo ka dhabaynta dhambaalka ARC ee ah dhismaha dadka.